



Taageero: Joe Biden, Madaxweyne & Kamala Harris, Madaweyne Ku Xigeen

Voice for Refuge waxa sharaf u ah inuu ku taageero Joe Biden Madaxweynenimada Maraykanka iyo Kamala Harris Madaxweyne Kuxigeenimada.

Joe Biden—waxa uu mudo dheer ahaa Xildhibaan Maraykan ah oo kasoo baxay Delaware iyo Madaxweyne Ku Xigeenkii Barack Obama—waana musharaxa xisbiga Dimuqraadigu uu soo xulay ee laga yaabo inuu yahay kii ugu muhiimsanayaa abid inta uu jiray xisbidu. **Qaxootiga waa la caayay intii uu Trump Madaxweynaha ahaa.** Midan takoorka, Islam nacaybka, iyo faquuqad Muslimka, Arfikaanka, Qaxootiga, Soo Galaytiga, iyo Mamnuucida dadka Magan Galyo Doobka Ahaa, inuu yareeyo 80% qaxootigii dalka soo geli jiray, inuu si bilaa arxan ah caruurta waalidkood marka ay xuduuda soo galaadhaan uga kaxeeyo, Trump waxa uu wax kasta u sameeyay si uu qaxoogita uga ilaaliyo inay dalka soo galayaan oo waxa uu ku tuntay xuquuqdooda. Tani waxaa weeye ku xad gudub aad u balaadhan oo waxa ay ka dhigan tahay ah naxariista bilaa aadanimo. Noloshu qaxootiga iyo awooda dadka inay kasoo baxsadaan dhibaato oo ay helaan amaan ayaa ah shay aad uga muhiimsan waxa musharuxu uu taageerada tartankiisa ku raadiyo.

Joe Biden duwaankiisa, aragtadiisa caalamka, iyo balanqaadkiisa ololaha waxa uu kasoo horjeedaa waxa Trump uu wado. Biden waxaa ka go'an dadaalkii qaxootiga ee tobonaanka sano soo jiray, maadaama oo aanu wada kafaalo qaadnay Sharciga Qaxootiga 1980, kaas oo laga duulayay markii la samaynayay barnaamijka dib u dejinta qaxootiga iyo nidaamka magan galyo doonka ah.ⁱ Waxaa cad in Biden uu u ololeeyo oo uu doonayo ilaalinta qaxootiga inay sii jirto, kaas oo ku baaqay in la soo celiyo oo dib loo dhiso dhaxalka Maraykanka ee soo dhawaynta.

Biden waxa uu taageersan yahay sharciga u diidata Trump Mamnuucida Muslimka, Afrikanka, Qaxootiga, Soo Galaytiga iyo Dadka Magan Galyo Doonka,ⁱⁱ oo Biden maamulkiisu waxa ay ilaalin doonaan qoysaska magan galyada doonaya.ⁱⁱⁱ Inkasta oo Trump uu yareeyay qaxootigii soo geli jiray oo uu ka dhigay 18,000 Biden waxa ka go'an inuu kordhiyo qaxootiga soo galaya Maraykanka waxaanu doonayaa inuu gaadhsiyo 125,000 taas oo markaa muujinaysa mabda'da taariikhiday oo waxa uu ku dooodaa baahida loo qabo in laga jawaabo mushkilada ugu ba'an ee baraka ah ee taariikhda caalamka.^{iv} Dadaalkan waxa weeye hormar lagu samaynayo kii maamulka Obama ee ahaa 110,000 oo ruux oo qaxooti ah oo waxaana la midayn doonaa qoysaska kala maqnaa sanado.^v

VOICE FOR REFUGE ACTION FUND

VoiceforRefuge.org

Ka hadlaya arrimaha: Joe Biden iyo Donald Trump

Arrinka	Donald Trump	Joe Biden
Dejinta Qaxootiga	Yaraynta soo gelitaanka qaxooga 80% oo ah 18,000 - taariikhiyan intii ugu yarayd. Burburin barnaamijkii dejinta qaxootiga, in qoysasku aanu isku iman oo ay nuglaadaan. ^{vi}	Waxa ay wada kafaale qaadeen Sharciga Qaxootiga 1980 si loo abuurto barnaamijka dejinta qaxootiga. Waxa aanu dib u dhisaynaa barnaamijka oo waxaanu qaadan doonaa 125,000 oo qaxooti ah sanadkii. ^{vii}
Mamnuuc Muslim-ka, Mamnuuc Afrikaanka, Mamnuuc Qaxootiga, Mamnuuc Qaxootiga, Mamnuuc Magan Galyo Doonka	Waxay abuurtay waxyaabahan damiirka u xun ee nacayb lagu mamnuucayo ^{viii} kaas oo markaa lagu kala kaxaynayo qoysaska, oo looguna hogaansami waayay amarada maxkamada ee markaa joojinaysay in taas la dhaqan geliyo.	Waxa uu ka hadlay sida uu uga soo horjeedo mamnuucidaas waxaanu ku baaqay in laga hor yimaado. ^{ix} Waxa uu qabtay madal dhagaysi oo dadka uu sameeyay ah midab takooran iyo nacaybta siyaasadahan ahi.
Qoysaska iyo shakhsiyaadka magan galyada dalbanaya	Diidmada dadka dalbanaya ilaalin, kala kaxaynta waalidka iyo caruurta, iyo diidmada magan galyo doonka taas oo ah xaalad keentey dhimasho, ^x eedo in khasab dadka lagu dhufaanay, ^{xi} iyo tacadi.	Waxa aanu soo dhawayn doonaa dadka magan galyo doonka ah, dib u midaynta qoysaska, in aanu maalgelino meelaha dadka lagu hayo ee kale ee bulshada dhaxdeeda ah, in aanu soo celino damiirkii iyo sinaantii nidaamka soo galaytiga Maraykanka.
Mamnuucida Barnaamijka Dejinta Qaxootiga Gobolka iyo Deegaanka	Waxa uu saxeeqay wareegto madaxweyne oo markaa u ogolaanaysa gobolada iyo deegaanadu inay diidaan qaxootiga (taas oo, nasiib wanaag, ay maxkamadu joojisay ugu yaraan si kumeel gaadh ah. ^{xii}	Waxa aanu diidi doonaa takoorka qaxootiga oo waxaanu kala shaqayn doonaa gobolada iyo deegaamada sidii loo taageeri lagaa qaxootiga iyo bulshooyinka soo dhawaynaya.
Xaalada Ilaalinta Kumeel Gaadhka ah (TPS)	Soo afjarka ilaalintii wax ka badan 300,000 oo TPS haysa oo kasoo jeedo meelo badan, taas oo ku khasbaysa inay ku noqdaan xaalada aan amaan ahayn. In kasta oo ay maxkamadu ilaalisay qaar kamid ah (aan ahayn gebi ahaanba) dadkii sitay TPS, Trump waxa uu sii wadaa inuu weeraro TPS.	Waxa aanu soo celin doonaa oo aanu balaadhin doonaa TPS iyo Joojinta Khasab Ku Tarxiilka (DED) si aanu u ilaalino shakhsiyaad dadka uu deegaanku saameeyay ama kuwa mushkilada bilaa aadanku abuuray ay saamaysay si marka ay qoysaskooda iyo bulshadooda ula joogi karaan.
Caruurta Ku Kortay Maraykanka iyo Kuwa Caruurnimadooda Ku Yimid (DACA)	Waxa uu isku dayay inuu soo afjaro DACA - taas oo markaa keeneysa in la tarxiilo dhalinyarta aan waraaqo haysan - in kasta oo ay haystaan amarka maxkamada ee ah inay helaan ilaalada DACA	Waxa uu ku baaqay inaalinta DACA si marka dhalinyarta aan waraaqo haysan ay u joogi karaan Maraykanka, oo sidoo kale ilaalada loo gaadhsiin karo qoysaskooda.
Ka hadalka qaxootiga, magan galyo doonka, iyo soo galaytiga kale	In la isticmaalo qaab sharax dhax iyo nacayb ah sida: "Ma ogolaanayno in dhamaan dadkani ay soo weeraraan Dalkeena. Marka uu qof soo galo, waa inaan markaba, iyada oo aan Xaakin ama Maxkamadtoona la marin, lagu celiyaa meesha uu ka yimid." ^{xiii}	In kor loo qaado soo galaytigu waa weeye waxa uu Maraykanku ku wanaagsan yahay: "Maalinta Qaxootiga Adduunka, waa inaan wada istaagnaa oo aynu samaynaa dadaalka ah inaynu dhisno Maraykan la wada leeyahay oo soo dhawayn leh. Waana taas sida aan ruuxda bulshadeena usoo celinaynaa." ^{xiv}
DARAJAYNTA A	XAGJIN KASOO HORJEEDA QAXOOTIGA	HOGAAN QAXOOTIGA TAAGEERSAN

VOICE FOR REFUGE ACTION FUND

VoiceforRefuge.org

Ka hadlaya arrimaha: Kamala Harris iyo Mike Pence

Arrinka	Mike Pence	Kamala Harris
Dejinta Qaxootiga	Waxa uu ka taageeraa Trump inuu yareeyo soo gelida qaxootiga, isaga oo sidoo kale sheegey inuu taageersan yahay dadka kasoo qaxa xasuuq diinta. Trump waxa uu yareeyay tirada dadka diimaha laga tirada badan yahay inay Maraykanka degaan waana intii abid ugu yarayd. ^{xv}	Waxay kasoo horjeeda yarayn qaxootiga soo galayay ee Trump, oo waxayna warqad u dirtay Xildhibaan badan si ay ugu doodo qaxooti badan in la qaato ^{xvi} . Safarkeedii ugu horeeyay ee Xildhibaanimo, Harris waxay booqatay qaxootiga Suuriya. ^{xvii}
Mamnuuc Muslim-ka, Mamnuuc Afrikaanka, Mamnuuc Qaxootiga, Mamnuuc Magan Galyo Doonka	Waxa uu taageerey siyaasada damiir la'aanta iyo nacaybka ah, intii uu ahaa badhasaabka, waxa uu isku dayay inuu ka mamnuuco qaxootiga Suuriyaanka ah Indiana. ^{xviii}	Waxay kasoo horjeeda mamnuucida damiir xumada ah, oo waxay kamid tahay dadkii waday xeerka lagu diidayo taas, oo waxay ka caawinaysaa Biden in taas lasoo afjaro. ^{xix}
Dhagaysiga iyo kor u qaadida codadka iyo walaacyada qaxootiga	Inuu ka taageerey Maamulka Trump qaabka lagu dilayo sharafta dadka doonaya noloshu dhaanta ee ka yimid dadka kale, iyo in aan la dhagaysan codadkooda ama tabashooyinkooda.	Hore iyo iminkaba waxay u dhagaysanayaa codadka iyo tabashooyinka qaxootiga iyo dadka magan galyo doonka ah, sidii ay samaysay oo kale AG Californiya iyo Xildhibaan Maraykan ahaan. ^{xx}
Caruurta Ku Kortay Maraykanka iyo Kuwa Caruurnimadooda Ku Yimid (DACA)	Waxa uu u coodeeyay Sharciga Dreams, oo waxaanu kala shaqeeyay Maamulka Trump sidii la iskugu dayi lahaa soo afjarida DACA oo loo mastaafurin lahaa dhalinyarta aan haysan waraaco. ^{xxi}	Waxa uu taageerey Sharciga Dream oo waxay ka taageeri doonaa Joe Biden sii jiritaanka DACA iyo in la balaadhiyo ilaalinta qoysaskooda.
DARAJAYNT A	XAGJIN KASOO HORJEEDA QAXOOTIGA	HOGAAN QAXOOTIGA TAAGEERSAN

Kamala Harris, oo ah Madaxweyne Ku Xigeenka lamaaneeeya Biden, sidoo kale waxay si wanaagsan u garanaysaa qaxootiga. Harris waxaa weeye gabaadh ay iska dhaleen waalid soo galayti ah oo Hindiya iyo Jamaica kasoo kala jeeda, waxayna si wayn nafteeda iyo xafiiskeeda ugu furtay qaxootiga, intii ay xeer ilaaliyaha ka ahayn California iyo Xildhibaan Maraykankaba. Harris waxay ka qayb gashay banaan baxyada lagu taageerayo qaxootiga, isku soo baxya iyo vigils, oo waxay si shakhsi ahaaneed ula kulantay qaxooti badan, dad magan galyo doona ah, iyo soo galayti kale si ay u ogaado sida ugu wanaagsan ee ay ugu ololayn karto. Waxay sidoo kale gacan ka gaysatay shan sharci oo qaxootiga lagu taageerayay oo waxayna saxeexday waraaco badan oo qaxootiga lagu taageersan yahay, oo ay ku jiraan kuwo ay qortay oo waxayna ku dhiiri gelisay Xildhibaan kale inay saxeexaan si ay ugasoo horjeedsadaan yaraynta Trump ee dejinta qaxootiga.^{xxii} Harris waxay sidoo kale qortay sharciga lagu siinayo adeegyada sharciga caruurta iyo dadka waawayn ee magan galyada doonaya.^{xxiii} Harris waxay si wayn uga soo jorjeeday oo ay in badan ka hadashay Mamnuucida Muslimka, Afrikaanka, Qaxootiga, Soo Galaytiga iyo Magal Galyada Dadka Doonaya ee Trump waxayna ku baaqday in la kordhiyo dejinta qaxootiga, waxayna sheegtey in Maraykanka ay saaran tahay masuuliyad wayn oo ah inuu soo dhaweeyo dadka kasoo qaxaya dhibta.^{xxiv}

Taas cakiskeeda, Madaxweyne Ku Xigeenka Trump Mike Pence waxa uu leeyahay duwaan laga xishoodo oo qaxootiga ah. Badhasaab ahaan, Pence waxa uu saxeexay wareegto lagu horjoogsanayo in qaxootiga Suuriyaanku ay soo galaan Indiana. Xaakinka federalka ah ayaa xukumay inay tahay "mid si cad u muujinaysa takoor ka dadka oo ku salaysan meesha ay kasoo jeedaan."^{xxv} Maamulka Trump / Pence waxa ay yareeyeen barnaamijka dejinta qaxootiga oo waxayna ku kaceen hayb sooc iyo Islam nacayb oo siyaasadooda waxay saamayn xun ku yeelatay qaxootiga oo waxayna kordhisay xadiga danbiyada nacaybka ee qaxootiga, Muslimka, iyo soo galaytiga jaarka ah. Pence waxa uu si buuxda uga taageerey Trump inuu yareeyo soo gelida qaxootiga, isaga oo sidoo kale sheegey inuu taageersan yahay dadka kasoo qaxa xasuuq diinta.

VOICE FOR REFUGE ACTION FUND

VoiceforRefuge.org

Maamulka Trump / Pence administration, tirada dadka kasoo jeeda diimaha yaryar ee Maraykanka degay waxa weeye intii ugu yarayn weligeed. Harris oo noqota Madaxweyne Ku Xigeenka waxa ay noqonaysaa mid si balaadhan u baabi'inaysa nacaybka qaxootiga ee Pence. Iyada iyo Biden waxay u qalmaan taageerada cid kasta oo qaxootiga taageeraday inay u codayso doorashada soo socota.

Dhamaan sababahan la sheegey, Voice for Refuge waxa sharaf u ah inuu ku taageero Joe Biden Madaxweynimada Maraykanka iyo Kamala Harris Madaxweyne Kuxigeenimada. Doorashadan Noofember ee madaxweynuhu aad ayay muhiim ugu tahay qaxootiga, soo galaytiga, iyo dad badan oo ka tirsan bulshooyinka laga tirada badan yahay oo ay ku jiraan Madawga, Dadka Dhaladka ah, iyo Dadka Midabka ah (BIPOC) shakhsiyaadka ah. Bayaanka Biden / Harris wuu u cad yahay dadka codka bixinaya ee danaynaya noloshada dadka barakacay iyo kuwa doonaya inay arkaan Maraykanka oo muujiya hogaanka damiir ee dalka dibadiisa iyo gudihisaba. Ilaalinta qaxootiga waa in damiir iyo mabda' ah. Waxa aanu ku dhiiri gelinaynaa dhamaan dadka u qalma inay u codeeyaan - iyaga oo ku codaynaya boosta ama inta ay yimaadaan - Biden / Harris ee doorashadan. Waxa aad xaqiijisaa inaad duwaan gashan tahay oo aad wakhti hore aad codayso. Khayraadka codaynta waxaa laga heli karaa [halkan](#). Waxaa khatar ku jira mustaqbalka qaxootiga—iyo mabaadii'deena qaran ahaan.

ⁱ S.643 - Sharciga Qaxootiga 1979. congress.gov, <<https://www.congress.gov/bill/96th-congress/senate-bill/643/cosponsors?searchResultViewType=expanded>>.

ⁱⁱ Joe Biden, Bayaankayga Maalinta Qaxootiga Adduunka. Barta, 06/20/2020. <<https://medium.com/@JoeBiden/my-statement-on-world-refugee-day-fddb4abddfd5>>.

ⁱⁱⁱ Biden Qorshihisa Ilaalinta Mabda'eena Bulshada Soo Galaytiga ah. Biden Madaxweynimada, 2020. <<https://joebiden.com/immigration/>>.

^{iv} Dahlia Lithwick, Sida Biden Uu U Badalayo Ajandihii Xumaa ee Trump. Kooxda Slate, 06/29/2020. <<https://slate.com/news-and-politics/2020/06/biden-refugee-plan.html>>.

^v Barack Obama, Go'aanka Madaxweyne -- Soo Gelida Qaxootiga ee Sanadka 2017. The White House, 09/28/2016. <<https://obamawhitehouse.archives.gov/the-press-office/2016/09/28/presidential-determination-refugee-admissions-fiscal-year-2017>>.

^{vi} "U.S. Annual Refugee Resettlement Ceilings and Number of Refugees Admitted, 1980-Present." The Migration Policy Institute. <<https://www.migrationpolicy.org/programs/data-hub/charts/us-annual-refugee-resettlement-ceilings-and-number-refugees-admitted-united>>.

^{vii} "The Biden Plan for Securing Our Values as a National of Immigrants." <<https://joebiden.com/immigration/>>.

^{viii} Timeline of the Muslim Ban. ACLU. <<https://www.aclu-wa.org/pages/timeline-muslim-ban>>.

^{ix} "Biden pledges to end Trump's 'Muslim ban' on his first day in office." <<https://www.cnn.com/2020/07/20/biden-pledges-to-end-trumps-muslim-ban-on-his-first-day-in-office.html>>.

^x "Deaths at Adult Detention Centers." <<https://www.aila.org/infonet/deaths-at-adult-detention-centers>>.

^{xi} "Whistleblower Alleges 'Medical Neglect,' Questionable Hysterectomies Of ICE Detainees." <<https://www.npr.org/2020/09/16/913398383/whistleblower-alleges-medical-neglect-questionable-hysterectomies-of-ice-detainees>>.

^{xii} "Judge Blocks Trump's Executive Order Allowing Local Officials To Reject Refugees." <<https://www.npr.org/2020/01/15/796658527/judge-blocks-trumps-executive-order-allowing-local-officials-to-reject-refugees>>.

^{xiii} Donald Trump, Twitter, Inc., 10/29/2018. <<https://twitter.com/realdonaldtrump/status/1010900865602019329?lang=en>>.

^{xiv} Joe Biden, "My Statement on World Refugee Day." <<https://medium.com/@JoeBiden/my-statement-on-world-refugee-day-fddb4abddfd5>>.

^{xv} "Closed Doors." World Relief and Open Doors. <https://worldrelief.org/content/uploads/2020/07/Closed-Doors-Report_-_Final.pdf>.

^{xvi} "FINAL Jud Letter on Refugee PD." <<https://www.leahy.senate.gov/imo/media/doc/11.06.19%20FINAL%20Jud%20Letter%20on%20Refugee%20PD.PDF>>.

^{xvii} "Sen. Kamala Harris visits troops, refugee camp in Middle East" <<https://abc7.com/politics/sen-kamala-harris-visits-troops-refugee-camp-in-middle-east/1885500/>>.

^{xviii} Stephen Rodrick, Mike Pence's Refugee Problem. Rolling Stone, 01/25/2017. <<https://www.rollingstone.com/politics/politics-features/mike-pences-refugee-problem-124345/>>.

^{xix} Voice for Refuge Scorecards: Kamala Harris. <<https://www.voiceforrefuge.org/senate-scorecards/kamala-harris/>>.

^{xx} Jeff Stein, Kamala Harris's immigration gamble. Vox Media, 09/01/2017. <<https://www.vox.com/policy-and-politics/2017/11/1/16554958/kamala-harris-immigration-california>>.

^{xxi} House Vote 625 - Approves DREAM Act. Pro Publica, 12/08/2010. <<https://projects.propublica.org/represent/votes/111/house/2/625>>.

^{xxii} "FINAL Jud Letter on Refugee PD." <<https://www.leahy.senate.gov/imo/media/doc/11.06.19%20FINAL%20Jud%20Letter%20on%20Refugee%20PD.PDF>>.

^{xxiii} Jeff Stein, Kamala Harris's immigration gamble. Vox Media, 09/01/2017. <<https://www.vox.com/policy-and-politics/2017/11/1/16554958/kamala-harris-immigration-california>>.

^{xxiv} Harris et al, Harris, Feinstein, Colleagues Call for a National Commitment to Refugee Resettlement on Third Anniversary of Trump's Travel Ban. U.S. Senator Kamala Harris, 01/28/2020. <<https://www.harris.senate.gov/news/press-releases/harris-feinstein-colleagues-call-for-a-national-commitment-to-refugee-resettlement-on-third-anniversary-of-trumps-travel-ban>>.

^{xxv} Stephen Rodrick, Mike Pence's Refugee Problem. Rolling Stone, 01/25/2017. <<https://www.rollingstone.com/politics/politics-features/mike-pences-refugee-problem-124345/>>.

VOICE FOR REFUGE ACTION FUND

VoiceforRefuge.org